

Ka caawi ilmaha inay saaxiibo yeeshaan ayna si amaan ah isdhexgal ugu sameeyaan oonleenka

Qayb wayn oo nolosha bulshada ee carruurta ayaa ka dhacda oonleenka. Haddii ay fariimo iskugu dirayaan kooxdoda casharka, ay isku shukaansanayaan baraha bulshada, ama ay cod ahaan ugu sheekaysanayaan aaladaha gaymamka, ardayda dugsiga dhexe iyo sare ayaa baran kara qaababka badqabka iyo caafimaadka leh ee ay u wada hadlaan. Xirfadahaan ayaa caawinaaya carruurta -- iyo dadka ay la hadlayaan -- ayna khibrado wanaagsan ka helaan oonleenka.

Akhri 4 taan tilmaamood

1

Sii erayada saxda ah.

Carruurta ayaa wax ka barta hadalka iyo ficilka wanaagsan ee ay kugu arkaan. Laakiin wada sheekaysiyada oonleenka ayaa noqon kara wax aadan u jeedin. Mararka qaar, sheeko u sheeg markaad qorayso fariimaha ama aad faalooyin ka bixinayso baraha bulshada marka carruurtaadu ay wax dhagaysanayaan.

2

Wax ka baro erayadooda.

Carruurta iyo kuraydu waxay leeyihiin qaabab wada hadal oo qaas ah—gaar ahaana markay ku sheekaysanayaan oonleenka. Inta ugu badan ee suuragalka ah, isha kuhay waxa ay dhahayaan ayna ku samaynayaan oonleenka si aad u fahanto nooca aduunyadooda. Ha xukumin wax kasta oo ay dhahaan, laakiin isha ku hay hadalka qalafsan ee cayda ah, hadalka nacaybka ah, sawirada qaawan, ama waxkasta oo waxyeelo u keenaaya. Haddii aad aragto wax khalad ah, ka hadal. Carruurta waxay u baahan yihiin in erayadoodu ay cawaaqib leeyihiin.

3

Ugu dhimiri cadaadiska saaran ee ku talax taga aaladaha ah.

Ilmaha iyo kurayda ayaa dareemi kara in lagu riixaayo faafinta sawir galmo sababo kaladuwan awgood: xujo, cabsida waxyeelada xariirka, ama keliya uu "qof kasta wuu sameeyaa." Laakiin arintaan waa laga wada hadli karaa. U sheeg inaad fahmayso dareenka xun ee ay leedahay inaad niyad jebiso saaxiibka. Kadibna ka caawi inay qiyaasaan ilaa xadka ay kasii xun tahay haddii sawirkooda qaawan lala wadaago ardayda dugsiga oo dhan.

4

kobci garaadkooda.

Ka caawi carruurta inay bartaan ku kalsoonaanta fikirkooda si ay iskaga diidaan xaaladaha xun, khatarta ah, ama haddii kale halista ku ah ee oonleenka ah. Tusaale muuqda ka sii dhawr sababood: Ka waran haddii qof ka codsado inuu wada sheekaysi gaar ah la yeesho? Ka waran haddii qof kaa codsado lambarka taleefankaaga? Ka waran haddii qof kugu casuumo qol wada sheekaysi gaar ah? Xasuusnoow in carruurta qaarkood (xataa carruurta "wanaagsan") ay ka daawadaan waxyaabo xun oonleenka keliya inay ogaadaan. Laakiin marka ay waxaas dhibsadaan, waxay u baahan yihiin inay iska tuuraan.

